**Private & Confidential**

Date

Name
Address 1
Address 2
Postcode

Ku socota <<patient name>>

Dhakhtarkaagu wuxuu maanta si degdeg ah kuugu soo gudbiyay isbitaalka si lagaa baaro calaamadahaaga. Maadaama tani ay tahay mid degdeg ah waa inaad ballan ka sameysaa isbitaalka laba toddobaad gudahood. Tani waxay noqon kartaa ballan rugta caafimaadka si aad ula kulanto dhakhtar takhasus leh ama baaritaan ogaanshaha, tusaale ahaan baaritaanka kamarada.

Calaamadahaagu waxaa sababi kara xaalado badan oo caadi ah, laakiin waxaan rabnaa inaan hubinno inaanan seegin wax halis ah, oo ay ku jiraan kansarka.

Dadka badankood ee sidan loo soo gudbiyo (in ka badan 10kiiba 9 ka mid ah) lagama helo kansarka. Hase ahaatee, waa muhiim inaad hore u hubiso si, haddii xaalad kasta u baahan tahay daaweyn, loo bilaabo sida ugu dhakhsaha badan.

Waxaad ka war maqli doontaa isbitaalka maalmaha soo socda si aad ballan u sameysato. La xiriir xoghayaha dhakhtarkaaga GP lambarka taleefanka ee warqaddan haddii aadan waxba ka warhelin 10 maalmood gudahood si aad u hubiso in gudbinta la sameeyay.

Aad ayey muhiim u tahay inaad dadaal kasta sameeysid si aad u timaado ballanta laguu siiyay.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato baaritaanno isbitaalka ah oo kaa caawin kara khabiirka inuu fahmo waxa sababi kara calaamadahaaga. Baaritaannadani waxay noqon karaan:

- Baaritaannada dhiigga
- Raajooyin
- Sawir-qaadis (CT/MRI)
- Baaritaannada kamarada

Waxaa laguu sheegi doonaa kahor haddii aad u baahan tahay baaritaan iskaanka ama kamarad, markaa fadlan raac tilmaamaha lagu siiyo. Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo natiijooyin isla maalintaas. Khabiirka ayaa awoodi doona inuu ku siiyo macluumaad dheeraad ah oo uu kula taliyo tallaabooyinka xiga ay noqon doonto.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad keento saaxiib ama xubin qoyskaaga ka tirsan. Tani waxay noqon kartaa mid waxtar leh haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan waxa kooxda caafimaadku kula hadasho. Haddii aad qabtid wax walaac ah ama su'aalo ah oo ku saabsan sababta loo gudbiyay fadlan la xiriir dhakhtarkaaga guud.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gudbinta degdegga ah fadlan booqo:
http://www.cancerresearchuk.org/cancer-symptoms/what-is-an-urgent-referral

Inta aad sugeyso ballantaada, waxaa lagula talinayaa inaad isku daydo inaad sii wadato hawlahaaga/jimicsigaaga caadiga ah. Haddii daaweyn dheeraad ah loo baahdo, qayb muhiim ah oo ka mid ah daaweyntaada ayaa noqon doonta in la wanaajiyo jirdhiskaaga - sida joojinta sigaarka iyo hagaajinta heerarka dhaqdhaqaaqa.

**<< GP>>**
**Surgery contact details**